Somali

UNHCR
The UN Refugee Agency


© UNHCR/M.Suryono

# Macluumaad dib u dejin oo Loogu talagalay dadka Qaxootiga

ALL UNHCR SERVICES, INFORMATION AND DOCUMENTS ARE FREE OF CHARGE.

## FURSADAHA DIB U DEJINTA WEY KOOBANYIHIIN

UNHCR-ta waxaa loo xilsaaray si aad u hesho xal waara oo loogu talagalay qaxootiga. Caalamka, waxaa jira saddex xal oo muhiim ah: celinta/noqosha iskaga ah oo ad kunoqota dalkaagi asalka ahaa, is-dhexgalka bulshada dalka magangelya doonka, iyo dib u dejin dal saddexaad. Indonesia, waxa kaliya oo la heli karo wa mid iska unoqosho ah iyo mid dib udejin qaxootiga.
Dib u dejinta macnaheedu wa in uu qofka/ta qaxootiga ka tago/tagta isaga / iyada dalka magangalyo doonka uu ku ahaa oo uu si sharci ah udego wadan kale. Dib u dejinta waxa kaliya oo heli karaan dadka lo aqoonsado qaxootinima.

**Dib u dejinta ma ahan xaq ay si toos ah u heli karaan dhammaan qaxootiga**.
Dib u Dejinta waa xal ay khuseysa keliya qaxootiga ku sugan xaalado gaar ah, iyada oo mudnaanta la siinaya kuwa loo arkaa in ay yihiin kuwa ugu nugul ama ubahaan ilaalin halis ah/adag. Haddii uu muharibka/muqhalaska ama dadka kale ay ku sheegeen inta Aaden imanin indonesia in aad ka heleeysid dib u dejin been ayay ku sheegeen.

Fadlan fahan xaq u yeelashada dib u dejinta waxba shaqa kuma laha mudada/waqtiga aad joogtay Indonesia UNHCR-ta waxay isticmaalaysa shuruudaha gaarka ah marka ay ubandigeysa/ ama u aqoonsanaysa dib u dejinta qaxootiga in uu ku salaysan yahay wax yeelka iyo ilaalinta baahida. Fadlan ha u soo qorin UNHCR-ta si joogta ah adigo weydiisanaya dib u dejin. Aqoonsiga wuxuu ku saleysan yahay qiimeyn oo ah kiis walba ku salaysan diiwaanka UNHCR-ta, ee ma ahan codsi laga helay qaxootiga. waraaqaha noocan oo kale ah waqti badan ayey shaqaalaha UNHCR-ta ka qataan oona dib u dhigeysa processka dib u dejinta.

Dalalka/wadamada dib u dejinta waxay bixiyan keliya tiro kooban sanad kasta, oo ay ka faa'iideysanayan in ka yar 1% dadka qaxootiga ah ee dunida oo dhan. madama Indonesia ay marti galisay tiro yar oo qaxooti ah marka la barbar dhigo dalalka kale ee magangalyo, tirada meelaha dib u dejinta loo siiyaa qaxootiga Indonesia waa ay kafogtahay/kayartahay sida uu qof walba ka rajeynaya. si fudud Waxaa jira qaxooti ka badan Indonesia waxaa jira meelo loogu talagalay dib u dejinta. Sidaa darteed waa inaad fahaanta iyo inaad ogolata in laga yaabaa in ad marnaba awoodin inaad ka faa'iideysan dib u dejinta Indonesia, waa inaad tixgelisaa fursadaha kale oo dhan oo aad heli karto oo ay ka mid tahay inaad ku laabata dalka aad ka soo jeedo haddii aad si ammaan ah u samayn karta/.

ALL UNHCR SERVICES, INFORMATION AND DOCUMENTS ARE FREE OF CHARGE.

UNHCR-ta wey fahansatahay /ogaatay in xaaladdan laga yaabaa in ay kugu tahay niyad-jab aad ah, laakiin duruufaha/xaaladaha jiraa wax la samayn karo malaha sida uu jecel yahay/rabitaanka qofka in dib u dajin lo sameya

## HAB RACA DIB U DEJINTA

**Haddii aad u qalanto in laguu tixgeliyo dib u dejin**, UNHCR-ta aya waraysi kula yeelan doonta adiga iyo xubnaha qoyskaga si ay u helaan macluumaad loo baahan yahay si dacwadaada logo bandhiga wadanka dib udijinta.

Qaxootiga uqalma dib u dejinta ma dooran karaan dalka lo gudbinayo, inkastoo UNHCR-ta aqoonsan doonta dalka ugu habboon iyada oo la tixgelinayo joogitaanka xubnaha qoyska ee waddamada dib u dejinta iyo shuruudaha codsiga oo dal kasta . go'aanka kama dambaysta ah oo ku saabsan ciida heli karta dib u dejin iyo ciida aan heli Karin wadanka dib u dejinta aya go'aankaas gaaraya .

Xaaladaha intooda badan, wakiillo ka socda dalka dib u dejinta aya qaban doonaa ugu yaraan hal wareysi si ay u qiimeeyaan kiiskaaga si wafaaqsan shuruudaha dib u dejinta wadanka si gaar ah. Waxaa lagula socodsiin doonaa waqtiga, goobta/meesha iyo waraaqaha loo baahan yahay in aad keenta inta lagu guda jira waraysiga.

Waxaa laguu sheegi doona natiijada waraysigaaga dib u dejinta, dalka dib u dejinta iyo / ama UNHCR-ta aya ku sheegi doona. Fadlan faham in uu prosseska qaadan karaa waqti badan iyo in ay UNHCR-ta aysan leheen door go'aansashada in aad xaq u leedahay dib u dejin dal gaar ah. **Go'aanka waxaa iska leh oo keliya wadanka dib u dejinta**.

Haddii dib u dejin lagu aqbalo , wadanka dib u dejinta wuxuu samaynaya baritaan xaga ammaanka wuxuuna ka codsani doona kadib(IOM-ta) baaritaan caafimaad.

ALL UNHCR SERVICES, INFORMATION AND DOCUMENTS ARE FREE OF CHARGE.

Wadanka dib u dejinta weli wuxuu go'aansan karaa in uu diida kiiskaaga. ugu dambeyntii hadii lagu aqbalo dib u dejin, iom-ta waxay guu sheegi doonta faahfaahin kusaabsan bixitankaga/safarkaga.

Haddii uu ku diido wadanka dib udejinta UNHCR-ta dib ayay u eegi kiiskaaga si loo ogaado in wadanka kala lagu gudbini kara .**<u>Tasina ma ahan wax lahuba , iyo waxay ku xirnaan doontaa asalka dacwaddaada iyo shuruudaha wadan kasta oo dib u dejinta</u>**.

Xusuusnow in aad adigu masuul ka tahay la socodsiinta UNHCR-ta isbedel walba oo ku yimaada deegankaaga ama xaalado kale, ay ka mid yihiin isbeddel ka kooban qoyska, si ay UNHCR-ta ula socodsiisa wadanka dib u dejinta.
**<u>Wa inaad mar walba runta ka sheegta waxa ku saabsan dhammaan dhinacyada kiiskaaga wareysi walba</u>**, sameynta musuqmaasuq nimo/khiyana inta u socda wareysiga dib u dejinta waxay keeni kartaa in la xiro dacwadada /kiiskaga dib u dejinta si joogta ah. Been ka sheegista xaqiiqda la xiriirta qoyska waa nooc ka mid ah musuqmaasuq/khiyama iyo waxay keeni kartaa diidmada dacwadaada dib u dajinta.
**<u>Dhammaan adeegyada,macluumaadka iyo dukumentiyada la xiriira dib u denjita waa lacag la'aan/Bilaash</u>**. Fadlan no soo sheeg qof kasta oo lacag kugu weydiisatay in uu ku siinayo dib u dejin ama dokumantiya safar, Waxaa yala/jira xafiiska daxdiisa sanduuqa iqtiraxyada/afkarta gudaha goobta soo dhaweynta UNHCR-ta si ad ugu sheegi karta meeshas arrimaha noocan oo kale ah. Waxaa aad lo ixtiramaya/la tixgelinaya waqti walba sirta .
**<u>Fadlan fahansanow prosseska dib u dejinta in ay muddo dheer qaadan kartaa</u>**. Sidaa darteed waa inaad samir yeelata una ogolata UNHCR-ta, IOM-ta, iyo wadanka dib u dejinta si ay u farsameyaan kiiskaaga. Fadlan ha u soo dirin unhcr-ta waraaqa soo noqnoqot ah adigo weydiinaya xaaladda kiiskaaga, anaga aya si toos ah kula so xiriiri doona

## SU'AALAHA JOOGTADA AH INTA BADAN LAYS WEYDIIYO

**Goormaan filan kara wareysi dib u dejin ah oo an la yesha UNHCR-ta?**

**Dib u dejinta ma ahan xaq toos ah ay uleeyihiin dhammaan qaxootiga**. Waxaa lagugu yeeri doonaa wareysiga dib u dejin kaliya haddii aad buuxisay shuruudaha gaarka ah. Haddii aadan buuxinin shuruudahaas wareysi oo dib u dejin ah malagula yeelanaya.

**Haddii ay unhcr-ta igudbisay, goorma wadanka dib u dejinta wareysi ila yeelanayaan?**
Hadii ay unhcr-ta ku gudbisay dib u denjin ,wadanka dib u dejinta aya soo sheegi doona waqtiga wareysiga ayago eegaya waqtigooda, Waa inaad filataa inaad sugaysid ugu yaraan 6 bilood ama ka badan in lagugu yeera waraysi.

**Haddii keyskeyga la aqbala/ogolada wadanka dib u dejinta, ilaa goormaan sugi karaa bixintankeyga?**
Taariikhda safarkaga waxay ku xirnaan doontaa natiijada baaritaanka caafimaad iyo baaritaanka ammaanka . Haddii lagu aqbala, wadanka dib u dejinta sidoo kale wuxuu u baahanyahay si ay isugu diyaariyaan imaashadada oo ay ku diyaariyaan, guri, barashada luqada iyo dhaqan hanuuninta. Sida caadiga ah, bixitaanka waa hal sano gudahood markii lagu aqbala kadib, laakiin waxay qaadan kartaa waqti dheer.

**xaaskayga iyo caruurtayda aya yimid Indonesia, maxaan sameynaya/sameeyaa?**
Fadlan soo war geli xafiiska UNHCR-ta si ad ku diiwan gelisa qoyskaaga. UNHCR-ta aya ballan u qabani doonta, si lo xaqiijiyo xaaladdooda qaxootinimo. Fadlan la soco in uu prosesskaan qaadan kara biloyin badan ayna sabab u tahay tirada badan ee howlaha porsseska kiisaska ee kasocda UNHCR-ta.

**Sidee baan ugu biiri kara xubnaha qoyskeyga kuwaas oo horey dib loo dejiye?**
Haddii aad tahay qof cusub oo hada imaday, fadlan so wargeli UNHCR-ta si ay kugu diiwaangelisa. Dib u djinta ku biirtaanka qaraabadaada waxaad u baahan tahay in laguu aqoonsado qaxootinima. Fadlan la soco in muddada sugitaanka go'aanka waraysiga qaxootinima hada ay tahay muda udaxaysa 18-24 bilood laga bilaabo wakhtiga diiwaangelinta. Haddii aad hore u tahay qaxooti la aqoonsan yahay, fadlan uso gudbi UNHCR-ta macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xubnaha qoyskaaga dibadda. Ogsoonow in aysan UNHCR-ta damaanad qaadi karin in aad la midoobi doonta xubnaha qoyskaga, go'aanka waxa sameyn kara dalka dib u dejinta. sidoo kale Ogsoonow in UNHCR-ta oo kaliya ay fududeyneysa isu keenitaanka qaraabada (xaaska, caruurta, waalidiinta, iyo mararka qaarkood walaalaha).

**Waxaa iidiiday dalka dib u dejinta. Maxaan sameya?**
UNHCR-ta ayaa dib u eegi doonta kiiskaaga si ay u qiimeeyaan bal in aad xaq u leedahay in ay dib ugu gudbin karan wadan kale. Tani ma noqon karto macquul waxayna ku xiran tahay asalka dacwadadad
iyo shuruudaha kale dalka dib u dejinta. Fadlan fahansanow in habracaan waqti qaadan kara.

**Waxaan leeyahay kafala qaad gooni ah/spoonsar dalka dib u dejinta. Maxay UNHCR-ta ii samayn karta/iiqaban karta?**
barnaamijyada noocan oo kale ah waa kuwa ka baxsan waajibaadka UNHCR-ta iyo kumana lug yeelaneeyna codsiyada noocas ah oo dib u dejinta. Waa in aad usheegta kafiilkaga/sponsarkaga in uu wax ka weydiiya masuuliyiinta dalka dib u dejinta. Waxaad sidoo kale u tagi kartaa safaaradda dalka dib u dejinta oo ad wax ka weydiin karta wax badan oo ku saabsan fursadaha sponsarada gaarka ah.

**Waxaan codsaday in la ii diro waddan gaar ah, laakiin UNHCR-ta kiiskeyga wadan kala ayey ugudbisey. mana doonayo/Rabo inan taga dalka ay UNHCR-ta ugudbisey kiiskeyga.**
Qaxootiga ma dooran karaan dalka loo gudbinaya, inkastoo UNHCR-ta ay aqoonsan doonta dalka ugu habboon iyada oo la tixgelinayo joogitaanka xubnaha qoyska waddamada dib u dejinta iyo shuruudaha dalka dib u dejinta. waxaad xaq u leedahay inaad diido in dib lagu dijiya/lagu diro wadan gaar ah, haddii aad sidaa sameeysa UNHCR-ta sida caadiga ah uma gudbin doonta dacwadaada wadan kale.

**Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha dib u dejinta wadankaan Indonesia?**
UNHCR-ta waxay bixisaa latalin xafiiska Jakarta Talaadooyinka, khamiisyada lagabilaba 13:00- 16:00. Fadlan la soco in an lagu balan qaadi karin in lagu heli kara turjubaan luuqadada, haddii aadan ku hadli karin Ingiriiska ama luuqada Indonesianka fadlan so kaxeysa qof kacawin kara la xiriirka unhcr-ta.

UNHCR-ta ayaa sidoo kale waxay bixisaa <u>la-talin taleefoon</u> jimca kasta inta u dhaxaysa 14:00 iyo 17:00. Nambarka ad laso xiriireysid waa:

**+62(21) 2964 3665**

**UNHCR Representation in Indonesia**
**Menara Ravindo**
**Jl. Kebon Sirih Kav. 75**
**Jakarta Pusat 10340 Indonesia**


ALL UNHCR SERVICES, INFORMATION AND DOCUMENTS ARE FREE OF CHARGE.
ALL UNHCR SERVICES, INFORMATION AND DOCUMENTS ARE FREE OF CHARGE.